

**Sharciga lamba. 15 Janaayo 1972.
Dhimista Lacagta Kirada Dhismayaasha Saraha iyo Baraaakooyinka**

GUDDOOMIYAH A GOLAHA SARE KACAANLA

Marka uu arkay Warqadda Koowaad Kacaankii 21 Oktoobar 1969;

Marka uu arkay Xeerka 12 Oktoobar 1971 lamba. 30 oo ku saabsan “Goynta lacagta kirada dhismayaasha magaaloooyinka la degganyaay iyo adeegyada kale oo faaidada leh”;

Marka uu arkay Xeerka 27 Setembar 1970 lamba. 62 oo ku saabsan dhimista lacagaha iyo joojinta kororsimo xilliyeedka ee mushaarooyinka shaqaalaha madaniga ee Dawladda.

Marka uu garowsaday baahida loo qabo in la dhimo lacagta kirada dhismayaasha saraha baraakooyinka ee loogu talagalay degitaanka iyo adeegtada kale ee faaiddada leh “ganacsiga, farshaxanka, farsamada iyo wixii la mida” oo si gaara ay degganyihiin muwaadiniinta soomaalida, oo aan jirin fursado loogu fidin kara sheeyaha aanay ku dhicin yaraynta mushaarooyinka iyo wax kale;

Marka uu dhagaystay Golaha Wasiirada Dawladda;

WUXUU MEELMARINAYAA

Xeerka soo socda:

Qod. 1

Laga soo bilaabo 1 Janaayo 1972, dhammaan kirooyinka dhismayaasha saraha iyo dhismayaalka baraakooyinka oo gaarka loo leeyahay, ayna degganyihiin dadka madaniga ama leh hawlgallo faaiida leh oo si gaara ay degganyihiin muwaadiniinta soomaalida waxaa hoos loo dhigay qaddar 20% lacagtii kirada ee lagu jideeyay qod. 1, 2 iyo 7 ee Xeerka 12 Abriil 1971. lamba. 30.

Qod. 2

Waxtarka dhimista ku xusan qod. 1 ee Xeerkaan laguma fidin karo shisheeyaha aanay ku dhicin dhimista lacagaha musharooyinka ee ku xusan Xeerka 28 Setember 1970 lamba. 62

Qod. 3

Kireeyeyaashu kama saari karaan kireystayaasha goobhaha sababa la xariira dhimista lacagta kirada ee Xeerkaanu dhigayo.

Qod. 4

Cidkasta oo ku xadgudubta Xeerkaan waxaa lagu qaadi karaa ciqaabta ku xusna qod. 6 ee Xeerka 12 Abriil 1971 lamba. 30.

Qod. 5

Waxaa la laalay xeer kasta oo ka soo horjeeda ama aan la jaan qaadi karin Xeerkaan.

Qod. 6

Xeerkaan waxaa laguu biirnayaas Uruurnta Rasmiga ee Xeerarka iyo Dekeretoooyinka Jamhuuriyadda Demoqaraadiga Soomaaliya.

Cid kasta waxaa ku waajiba in ay u hoggaansanto iyo ilaalso ka Xeer Dawladeed ahaan.

Muqdisho, 12 Janaayo 1972.

Guddoomiyah
Golaha Sare Kacaanka
S. Gaas Maxamed Siyaad Barre